



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Oktoobar 16, 2020

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS, oo ay ka mid yihiin dadka iyo qoysasku

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Hagida Dugsiga ee ODDS

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon waxay aqoonsan yihiin dhibaata ay leedahay maareyntu dugsigu, adeegyada guriga dhexdiisa, iyo qoyska iyo nololsha shaqo inta lagu jiro cudurka baahsan ee COVID-19. Sababtani awgeed, ODDS ayaa soo saartay hagitaan cusub oo lagu caawinayo qoysaska leh carruurta qabta naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) iyo dadka xirfad leh ee iyaga ka taageera in ay fahmaan doorka adeegyada ay ODDS dhaqaalihiisa bixiso inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2020-21.

Hagitaanka waxaa ku jira macluumaad ku saabsan adeeg bixiyaha inta lagu jiro maalmaha dugsiga. Is xasuusin ahaan, adeegyada ay ODDS dhaqaalihiisa bixiso looma isticmaali karo taageerada waxbarasho, tilmaamaha iyo adeegyada ku jira Barnaamijka Shakhsiyadeed ee Waxbarasho (IEP), ha noqoto in la joogo guriga ama dugsiga. Tani waa xaddidaada federaalku ee dhanka adeegyada Medicaid ee la bixiyo iyada oo la adeegsanayo ODDS, ma aha xeerka gobolka ama ODDS. Si kastaba ha ahaatee, waan ognahay in kani uusan ahayn sanad dugsiyeed caadi ah. Dokumentiga dhanka hagidu wuxuu tilmaamayaa sida adeeg bixiyaha loo isticmaali karo inta lagu jiro maalmaha dugsiga inta lagu jiro waqtiyadan adag.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo taageerada dhanka u doodida, dadka iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta waxaa

lagu dhiirigelinayaa in ay la xiriiraan kooxda IEP ee carruurta, agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmadooda, ama FACT Oregon. Isku duwayaasha Adeegyada/Wakiilada Shakhsiyeed iyo shaqaalaha Hay'adda Maamulka Kiiska ee kale waxay la xiriiri karaan Carrie Salehiamin, carrie.a.salehiamin@dhs.oregon.gov

Waxaan u mahad celinaynaa wax kasta oo qoysaska iyo daryeel bixiyayaashu ay qabanayaan inta lagu jiro waqtiyadan adag.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.